



## Qorshaha Iskaa-u-Shaqeysiga ee WCCC

### WCCC Self-Employment Plan

**Waa in aad bixisaa caddeynta ganacsigaaga iyo dakhligaaga.**

1. MAGACA MACMIILKA			
2. AQOONSIGA MACMIILKA EE DCYF			
3. MAGACA GANACSIGA		4. LAMBARKA AQOONSIGA GANACSIGA (UBI) EE ISKU MIDKA AH	
5. NOOCA GANACSIGA <input type="checkbox"/> Ganacsi Hal Qof Leeyahay <input type="checkbox"/> Iskaashi Guud <input type="checkbox"/> Iskaashato <input type="checkbox"/> Iskaashi Xaddidan <input type="checkbox"/> Shirkad Mas'uuliyad Xaddidan Leh <input type="checkbox"/> Iskaashi Mas'uuliyad Xaddidan Leh			
6. MAGACA ISKAASHIGA AMA XUBNAHA SHIRKADDA LA SHARCIYEEYAY			
7. MIYAAD XIRIIR LA LEEDAHAY SHAKHSIGA(SHAKHSIYAADKA) XARIIQA 6AAD <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya Haddii ay haa tahay, sidee:			
8. CINWAANKA WADDADA	MAGAALADA	GOBOLKA	SUMMADA DEGAANKA
9. LAMBARKA TELEFOONKA GANACSIGA			
10. NOOCA GANACSIGA (TUSAALE XISAAB-HAYAN, DARYEELKA CARRUURTA)			
11. GANACSIGAAGU MA YAHAY MID GURIGA KU YAALLA? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya			
12. HAWLAHAAGA SHAQO OO DHAN MIYAA GURIGA LAGU QABTAA? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya			
13. BIXI JADWALKA HAWLAHA SHAQADA EE LA QIYAASAY			
<b>Macluumaadkan waa sax wuxuunna si sax ah uga turjumaa dakhligeyga iyo ganacsigeyga iskaa-u-shaqeysiga ah. Waxaan fahamsanahay in aan mas'uul ka ahay in aan dib u siiyo Gobolka Washington wax kastoo lacag-bixin dheeraad ah ee dheefaha WCCC haddii macluumaadkan uu qaldan yahay.</b>			
SAXIIXA			TAARIKHDA

## Tilmaamaha Qorshaha Iskaa-u-Shaqeysiga WCCC

1. Qor magacaaga oo dhan, magaca sharciga ah. Kani waa in uu u dhigmaa shatigaaga darawalka ee ansaxa ah, ama aqoonsiga kale ee ansaxa ah.
2. Qor lambarkaaga aqoonsiga macmiilka ee DCYF. Haddii aad haysato lambarka aqoonsiga macmiilka ee DCYF, qor Lambarkaaga Dammaanada Bulshada (SSN).
3. Qor magaca ganacsigaaga.
4. Qor lambarkaaga (Aqooniga Ganacsiga Isku Midka ah) UBI-ga ee 9-lambar ah.  
Ka hel UBI bartan: <http://bls.dor.wa.gov/file.aspx>
5. Doorro nooca ganacsigaaga. Haddii aadan hubin waxa uu yahay nooca ganacsigaaga, booqo bartan: <http://bls.dor.wa.gov/ownershipstructure.aspx>
6. Haddii ganacsigaagu uu yahay iskaashi ama iskaashato, halkan ku qor magacyada dadka aad isla leedihiin ganacsiga.
7. Haddii uu xiriir idin ka dhaxeeyo shariiggaaga ganacsiga, halkan ku qor xiriirka. (Tusaale, wiilkaaga, lammaanahaaga, hooyadaada, iwm.)
8. Halkan ku qor cinwaanka waddada oo dhammeystiran ee ganacsigaaga.
9. Halkan ku qor lambarka telefoonka ganacsigaaga.
10. Si kooban u sharax nooca ganacsiga ee aad hawlgeliso.
11. Miyuu ka hawlgalaa ganacsigaaga meel ka baxsan gurigaaga?
12. Haddii aad ka hawlgalo ganacsigaaga meel ka baxsan gurigaaga, miyay shaqadaada oo dhan ka dhacdaa xafiiskaaga guriga ka yaalla?
13. Qor ama ku soo lifaaq qiyaasta saacadaha aad ku bixiso iskaa-u-shaqeysiga  
Tusaale:
  - Isniin, 4 saacadood, shaqooyin jadwaleysan, xafiis guriga ah.
  - Talaado –Khamiis, 8 saacadood maalin kasta oo dhul qurxin ah, ka baxsan xafiiska guriga.
  - Jimco, 6 saacadood, shaqo buug iyo biilal, xafiiska guriga.

### Ikhtiyaarka Ganacsiga ee Cusub

La heli karo keliya hal jeer qofka noloshiisa oo dhan.

Haddii aad bilaabeyso ganacsi cusub, waxaad dooran kartaa midkood:

- Bixinta bayaanka khasaaraha iyo faa'iidada ee la qiyaasayo iyo qiyaasta dakhliga aad filayso in aad kasbato, iyo kharashaadka aad filayso in aad bixiso, iyo qiyaasta saacadaha daryeelka carruurta ee aad u baahan doonto;  
**AMA**
- Bixinta qiyaasta tirada saacadaha aad filayso in aad ku shaqeyso iskaa-u-shaqeysigaaga toddobaad kasta. Saacadadaasi ku dhufo mushaarka federaalka ee ugu yar ee dakhliga toddobaadlaha. Dakhliga toddobaadlaha ku dhufo 4.3 ee loogu talagalay dakhliga bilaha. Qaado ka jarista caadiga ah oo dhan \$100. Bixi qiyaasta saacadaha daryeelka carruurta ee aad u baahan doonto.

### Xaqiijinta (Caddeynta) Hawlaha iyo Dakhliga Iskaa-u-Shaqeysiga

WCCC WAC 110-15-0050 wuxuu u baahan yahay codsadayasha iskaa-u-shaqeystayaasha ah iyo macaamiisha in ay bixiyaan macluumaad gaar ah oo ku saabsan iskaa-u-shaqeysiga. Hubso in aad DCYF siiso nuqullada macluumaadkan soo socda:

- Shatiga ganacsiga gobolka Washington; ama shatiga shaqada ama ganacsiga magaalada, degmada, ama qabiilka.
- Warqadda shaqada iskaa-u-shaqeysiga DEL oo buuxda (loogu talagalay macaamiisha WCCC oo keliya ee aan TANF-ahayn).
- Foomka ka warbixinta canshuurta iskaa-u-shaqeysiga ee Federaalka ee warbixintii ugu dambeysay ah; Ganacsiyada jir waa in ay u soo gudbiyaan nuqullada xareynta canshuurta federaalka ama gobolka ee dhowaan ahayd sida dakhli xaqiijinta ee ganacsigooda iskaa-u-shaqeysiga.